

Ogaysiiska la Kulanka ee Qoyska - Cold Sores/Finanka Xummadda

Gacaliye Qoys:

Ilmahaagu wuxuu qaaday cold sores. Infakshankan waxa keena fayras wuxuuna ku badan yahay carruurta iyo dadka waawayn. Tan waxa keena Herpes Simplex Virus. Kani ma aha fayras la mid ah kan keena genital herpes.

Waa maxay astaamuhu? Waxay ku bilaabmaan finan dheecaan leh oo dheenaanku saafi yahay oo kadib qolof yeesha. Waxa la socon kara xummad, cuncun iyo xanuun iyo qanjidhada difaaca (lymph nodes) oo barara. Marmarka qaar ma jiraan wax astaamo ah waxayna muuqdaan muddo kadib.

Sidee ayuu ku faaftaa? Waxa lagu faafiyaa taabashada boogta ama candhuufta qofka xanuusan.

Goorma ayey astaamuhu bilaabmaan? Kaarku wuxuu muuqan karaa 2 maalmood ilaa 2 toddobaad kadib qaadista.

Ma loo baahan yahay ilmaha in guriga lagu hayo? Haa, ilaa kaarku uu qolofayso oo uu daboolka yeesho.

Haddii ilmahaagu muujiyo wax kamid ah calaamadaha cold sores fadlan ku wargeli bixiyaha daryeelka caafimaadka oo ogaysii in ilmahaagu xanuunka qaaday. Fadlan wargeli xaruntaada Early Learning Center haddii ilmahaagu laga baadhay cold sores.

Shaqaalaha: _____ Taleefanka: _____

Xarunta: _____